

Ka-tanaasulka Dhageysiga Luminta Xuquuqda ee Maamulka

Waiver of Administrative Disqualification Hearing

Loogu Talagalay Barnaamijyada Gargaarka Cuntada ee Washington

TAARIKHDA	MAGACA MACAMIILKA	LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA EE MACMIILKA:	TAARIKHDA DHALASHADA EE MACMIILKA	LAMBARKA AQOONSIGA SHAKHSIGA EE MACAMIILKA
-----------	-------------------	--------------------------------------------------	-----------------------------------------	--------------------------------------------------

Waxaa lagu diray Dhageysiga Maamulka iyada oo lagu saleynayo aaminsanaanteenna ah in aad ku kacday Xadgudub Barnaamij Ula-kac ah (IPV). Waxaad xaq u leedahay in aad ka soo muuqato dhageysiga oo aad diiddo ama ka doodo eedaymaha lagugu soo eedeeyay. Sidoo kale w axaad xaq u leedahay in aad ka-tanaasusho (iska-dhaafto) xaq aad dhageysiga u leedahay. **Haddii aad go'aansato in aad ka-tanaasusho dhageysigaaga, waxaad u baahan tahay in aad oggaato macluumaadkan soo socda:**

- Haddii aad saxiixdo heshiiskan, w axaad lumin doontaa dheefaha w axaanna jiri doona dhimid lagu sameynayo dheefaha muddada luminta oo dhan xataa haddii aadan qiranin xaqiiqooyinka ay kugu soo eedaysay Hay'adda Dow ladda.
- Khasab ma ah in aad qirato w ax eedaymo ah. Waxaad xaq u leedahay in aad ka aamusto eedaymaha, maadaama w ax kasta oo aad sheegto ama saxiixdo lagu adeegsan karto maxkamad sharci.
- Haddii aad saxiixdo ka-tanaasulkan, w aa in aad sidoo kale doorataa mid ka mid ah bayaamadan soo socda si aad u muujiso haddii aad xaqiiqooyinka sida lagugu soo eedeeyay u qiraysa iyo haddii kaleba:
 - Waxaan xaqiiqooyinka u qirayaa sida loo soo bandhigay w axaanna fahamsanahay in ciqaab lumin ah la igu soo rogi doono haddii aan saxiixo ka-tanaasulkan.
 - Ma qirayo xaqiiqooyinka sida loo soo bandhigay in ay sax yihiin. Hase-yeeshee, w axaan doortay in aan saxiixo ka-tanaasulkan w axaanna fahamsanahay in ciqaabta luminta ah ay keeni doonto.
- In xubnaha qoyska qaangaarka ah ee haray, haddii ayba jiraan, loo qabsan doonaa mas'uuliyadda bixinta qaansheegga ka dhasha.
- Ciqaabtu w aa isku mid haddii aad doorato in aad hesho dhageysi oo la go'aamiyo in aad dambiile tahay, ama haddii aad dhageysiga ka tanaasusho.

Ka-tanaasulkan waa in lagu soo celiyo maalmaha taariikhda kor ku xusan. Haddii kale ka-tanaasulka waxaa lagu soo celiyaa w axaad, Dhageysi Maamul ayaa la jadwaleyndoonaa.

Haddii shakhsiga eedaysanaha ah uusan ahayn madaxa qoyska, madaxa qoyska waa in uu sidoo kale saxiixaa ka-tanaasulkan sida ku cad 7 CFR 273.16(3).

Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah, waxaad kala xiriiri kartaa **Telefoonka .**

Sharraxaadda Xuquuqahaaga Dhageysiga

Haddii xaqiiqooyinka sida loo soo bandhigay aadan qirin in ay sax yihiin oo aadna jeceshahay in aad adeegsato xaq aad u leedahay Dhageysiga Maamulka, uma baahnid w ax dheeraad ah in aad sameyso.

Waxaa lagu soo ogeysiin doonaa taariikhda iyo w aqtiga dhageysiga Xafiiska Dhageysiyada Maamulka. Ogeysiiska w axaa ku jiri doona xuquuqaha dhageysiga ee ku taxan liiska ku qoran 7 CFR 273.16(e)(3).

Digniinta Ciqaabta ee Barnaamijka Gargaarka Cuntada

Sida ku cad xeerka WAC 388-446-0020, qofka ma helayo dheefaha gargaarka cuntada:

Hal sano haddii isaga oo aqoon u leh ku xadgudbo sharciga gargaarka cuntada ama Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeriga ah (SNAP);

Labo sano haddii uu ku kaco xadgudubka noocaas ah mar kale; ama markii ugu horreysay lagu helo in uu ku iibsaday, ku iibiyay ama ku bedeshay dheefaha gargaarka cuntada ama SNAP daroogo la kantaroolo;

Toban sano haddii isaga oo ogsoon bixiyo aqoonsi ama macluumaad degganaansho been ah si uu u helo dheefo badan;

Noloshiisa oo dhan haddii:

Isaga oo ogsoon jebiyay sharciga gargaarka cuntada ama SNAP markii saddexaad;

Mar labaad lagu helo in uu ku iibsaday, ku iibiyay ama ku bedeshay dheefaha gargaarka cuntada daroogo la kantaroolo;

Lagu helo in uu ku iibsaday, ku iibiyay ama ku bedeshay dheefaha gargaarka cuntada hub, rasaas, ama w axyaabo qarxa; ama

Lagu helo in uu iibsaday, iibiyay ama w ax ku bedeshay dheefaha cuntada oo qiimahoodu gaarayo \$500 ama in ka badan.

Shakhsiyadka iyaga oo ogsoon ama si ula kaca ah u jebiyay sharciga gargaarka cuntada waxaa lagu soo oogi karaa dembi w axaanna lagu ganaaxi karaa ilaa \$250,000 ama waxaa ay muteysan karaan xabsi gaaraya ilaa labaatano sano ama labaduba. Sidoo kale dembi ayaa lagu soo oogi karaa iyada oo la raacayo shuruudka kale ee federaalka.

SAXIIXA QOFKA LUMIYAY XUQUUQDA	TAARIIKH	SAXIIXA MADAXA GURIGA (HH)	TAARIIKH (HADDII EEDAYSANHA UUSAN AHAYN MADAXA GURIGA)
--------------------------------	----------	----------------------------	-----------------------------------------------------------